

Dadka dembiileyaasha lacagaha u qabto/hayo

- Dhallinyarada waxaa lagu khiyaameeyaa
in dembileyaal ay noqdaan

Lacagaha dambifallada ka soo gala awgeed waxay kooxaha dembiilayaasha adeegsadaan carruurta iyo dhallinyarada. Dhallinyarada waxaa lagu khiyaameeyaa, lagu qasba ama lagu hanjabaa in akawntigooda kala baxaan ama ku xawilaan lacagaha dembiilayaasha ku kaydsadeen. Waxay ka dhigtaan dadka dembiileyaasha lacagaha u qabto/hayo. Qofka dembiileyaasha lacagaha u qabto/hayo wuxuu noqda dambiile.

Ma ogtahay in:

- ◆ Qofka dembiileyaasha lacagaha in u qabto/hayo u fal dambiyeed ku kacay xitaa haddii usan ogayn in falka u yahay fal dambiyeed.
- ◆ Falalka lacagaha si sharcidarro ah loogu rogo lacago sharchiyeysan waa fal dambiyeed, waana falal faleha lagu cizaabi karo iyo in u lacagaha dib u soo celiyo. Faleha waxaa laga mamnuuci karaa in u isticmaalo BankID iyo Swish
- ◆ Qofka dembiileyaasha lacagaha u qabto/hayo waxaa goor dambe lagu qasbi karaa in u ku kaco falal dambiyeed oo aad u culus. Qofka dembiileyaasha lacagaha u qabto/hayo waxaa lagu qasbi karaa in u ku kaco falal dambiyeed oo aad u culus, kuwaasoo ay kamid yihiin in u isticmaalo hub, tuuro waxyaalaha qarxa ama u qof dilo.




Maskaxda ku hay in:

- ◆ Maadaama aad tahay xilhaayeha xannaanadda/waalidka ilmo aan qaan-gaar ahayn, waxaad xaq ku leedahay inaad kormeerto akawntiga ubadkaaga. Haddii aad kormeerto waxaad heleysaa fursad aad ula socoto dhaqdhaqaqa lacagaha, sida u isticmaalo waxaana shaacbixin kartaa lacagaha aan caadiga ahayn ee xisaabtiisa lagu soo shubay.
- ◆ Waxaa fiican inaad la socoto waxa ubadkaaga ama da'yarka agtaada ku sugar u baraha internet ka qabto. Waydii su'aal, sida tusaale "maxaa maanta baraha internet ka dhacay?"
- ◆ Ma shaacbixisay in lacagaha akawntiga ubadkaaga lagu soo shubay in loola xiriirin karo kuwa dembiileyaasha? Xaaladdaas la xiriir bangiga kaddib wargeli ciidanka booliska.

Waa kuma qofka dembiileyaasha lacagaha u qabto/hayo?

Qofka dembiileyaasha lacagaha u qabto/hayo waa qof akawntigiisa la adeegsado, wuxuu dembiileyaasha ka caawina in lacagaha dembiileyaasha ka soo gala falal dambiyeedyada lagu wareejiyo ama lagala baxo akawntiyada.

Falalka lacagaha sharcidarrada loogu rogo lacago sharchiyeysan waa hab oo hab-dhiska dhaqaalaha lagu kхиyaameeyo oo loogu dhigo lacago sharchiyeysan. Falalka lacagaha sharcidarrada loogu rogo lacago sharchiyeysan waa falal lagu qarinayo falal dambiyeedyadii lacagaha lagu helay.



Warbixin dheeraad ka aqriso:
polisen.se/ung-penningmalvakt